

TALLAALKA COVID-19

Bogga 1 ee 1

- I. **SHARAXAADA, UJEDADA IYO DHEEFAHA LAGA FILAAYO HABRAACA TALLAALKA.** Waxaan fahamsanahay in aan ku qaadan doono tallaalka irbad duritaan, kaas oo loogu talagalay in lagu yareeyo fursadaha aan ku xanuunsanayo sababa la xiriiro caabuqa COVID-19. Caabuqyada COVID-19 waxay yeelan karaan dhibaatooyin halis ah oo nafta halis gelin kara. Iyada oo ku xiran tallaalka gaarka ah ee COVID-19, waxaa laga yaabaa inaan u baahdo hal ama laba irbadood midkood iyo irbado xoojin ah oo joogta ah. Waxaan idiinku raacsanahay inaan sii joogo goobta tallaalka mudda ugu yaraan ah 15 daqiiqo ka dib marka tallaalka la bixiyo si wax la iigu qabto haddii aan falcelin xun ka yeesho tallaalka.
- II. **KHATARAHA SUURTAGALKA AH IYO XADDIDAADYADA LA XIRIIRA HABRAACA.** Waxaan fahamsanahay in aan kala kulmi karo xanuun, guduudasho, iyo/ama barar goobta la iga duray. Khataraha iyo faa'iidooyinka tallaalka kale ee la yaqaano ee muhiimka ah, iyo baaxada inta aan la garanayn khatarahaas iyo faa'iidooyinkaas, ayaa lagu qeexay Xaashida Macluumaadka Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (*Emergency Use Authorization, EUA*) ee FDA (Food and Drug Administration). Waxaan helay oo akhriyay Xaashida Macluumaadka iyo liiska hubinta tallaalka ka hor ah ee loogu talagalay tallaalka. Haddii aad qabo su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan habraaca, waxaan weydiin doonaa iyaga ka hor inta aanan gudagalin qaadashada tallaalka. Ma cadda ilaa inta faa'iidooyinka suurtagalka ah ee tallaalka laga heli karo ay soconayaan; ama haddii ay waxtar u yeelan doonto isbaddelka qaababka fayraska COVID-19. Waxaan fahamsanahay inaan weli la xanuunsan karo COVID-19, oo laga yaabo inaan awoodo inaan u gudbiyo fayraska shaqsiyaad kale. **Sababtan darteeda, tallaalka ma ciribtiraayo baahida loo qabo xirashada maaskarada jirka, kala fogaanshaha bulshada, iyo nadaafadda gacmaha.**
- III. **IKHTIYAARADA KALE EE DAAWEYNTA.** Waxaan fahamsanahay inaan diidi karo tallaalka COVID-19. Wakhtigani ma jiraan ikhtiyaaro kale oo waxtar leh oo la ogyahay oo lagaga hortago caabuqyada COVID-19, oo aan ka ahayn xirashada maaskarada jirka, kala fogaanshaha bulshada, iyo nadaafadda gacmaha.

IV. **TAXADARRADA/ISDIIDOOYINKA** *Tallaalka waxa dhici karta inaan lagu sheegin iyadoo ku xiran jawaabaha jirkaagu bixiyo.*

Maanta xummad ama xanuun ma dareemaysaa?	<input type="checkbox"/> Maya ama <input type="checkbox"/> Haa – haddii ay haa tahay, marka dib u dhig ilaa aad soo
Taariikh ahaan xasaasiyad ma ka qaadda (tusaale, anaphylaxis, barbarar, cuncun) wax kamid ah waxyaalaha tallaalku ka kooban yahay?	<input type="checkbox"/> Maya ama <input type="checkbox"/> Haa – haddii ay haa tahay, marka JOOJI, tallaalka ha QAADAN.
Hore ma kuugu dhacday inaad xasaasiyad si dhakhso ah uga qaadday tallaalka kale?	<input type="checkbox"/> Maya ama <input type="checkbox"/> Haa – haddii ay haa tahay, marka la tasho dhakhtar ama ka feker inaad dib u dhigto tallaalka.
Hore ma kuugu dhacday inaad xasaasiyad si dhakhso ah uga qaadday daawo la isku mudo ama waxyaalaha xididka laga qaato ee sawirka jirka muujiya?	<input type="checkbox"/> Maya ama <input type="checkbox"/> Haa – haddii ay haa tahay, marka la tasho dhakhtar ama ka feker inaad dib u dhigto tallaalka.
Taariikhda anaphylaxis?	<input type="checkbox"/> Maya ama <input type="checkbox"/> Haa – haddii ay haa tahay, marka fiiri 30 daqiiqo.

- V. **ISTICMAALKA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA.** Waxaan fahamsanahay in diiwaannada bixinta tallaalka iyo qiyaasaha xoojiyeyaasha joogtada ah lagu wargelin doono gobolka iyo/ama hay'adaha sharciyeynta federaalka. Waxaan oggolahay in diiwaankayga tallaalka COVID-19 lala wadaago dhakhtarkayga daryeelka aasaasiga ah; iyo in loo isticmaalo ama loo wadaago lacag bixinta darteed, tayada daryeelka, badbaadada bukaanka, iyo ujeedooyinka cilmi baarista. Haddii aan hadda u shaqeeyo MaineHealth, waxaan sidoo kale u oggolaaday MaineHealth awoodeeda bixiye daryeel caafimaad ahaan si ay u bixiso diiwaanada ku saabsan maamulka tallaalka iyo wixii garoojooyinka xoojinta ah ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka Shaqaalaha ee MaineHealth iyo inay gasho macluumaadka tallaalka ee laga heli karo saldhiga xogta ImmPact ee gobolka. Haddii kale, macluumaadka waxaa loola macaamili doonaa si waafaqsan Ogeysiiska MaineHealth ee Dhaqamada Asturnaanta ee Macluumaadka Caafimaadka, oo loogu heli karo onlayn barta <https://www.mainehealth.org/-/media/Maine-Medical-Center/Files/Psychiatry/Notice-Privacy-Practices-2017.pdf>, oo leh nuqulo daabacan ayaa sidoo kale la heli karaa haddii la codsado.
- VI. **XIRIIRKA TALEEFOONKA.** Waxaan oggolahay inay igula soo xiriiraan MaineHealth ama wakiiladeedu taleefoon (midka gacanta ama laynka), farriinta qoraalka ah, ama farriinta codka ah iyadoo ku soo hagaajinaya lambarka taleefoonka ee aan hore u bixiyey. Oggolaanshahani wuxuu khuseeyaa shakhsiyadka aniga badelkayga matalaya.

Magaca Xiriirka Degdegga ah: _____ **Lambarka Taleefoonka ee Xiriirka Degdegga ah:** _____

Taariikhda Wakhtiga AM|PM **X**
Saxiixa Bukaanka Waalidka Mas'uulka Wakiil Idman

Magaca oo Far
Waawayn ku Qoran

Haddii oggolaanshaha taleefoon uu ku bixiyey: Bukaanka Kuwa kale _____

Lambar taleefoon _____

Taariikhda Wakhtiga AM|PM **X**
Saxiixa Maragga (Oggolaanshaha taleefoonka ah ama marka bukaanku aanu jir
ahaan saxeexi karin)

Magaca oo Far
Waawayn ku Qoran

Turjubaanka loogu talagalay: Uqadda Calaamadaha Uqadda Qalaad Kuwa kale _____

Magaca oo Daabacan ama macluumaadka aqoonsiga _____

Taariikhda Wakhtiga 24 Saac **X**
Saxeexa Dhakhtarka ama Wakiilka

Magaca oo Far
Waawayn ku Qoran

Isticmaalka Shaqaalaha Oo Kaliya:

Bukaanku wuxuu ku **yeeshay** isla markiiba falcelin xun tallaalka. Bukaanku **kuma yeelan** isla markiiba falcelin xun tallaalka.